

Buugan yar waxaa loogu tala galay dadka loo qoray daaweynta iyadoo la isticmaalaya qalabka neefsashada ee Respimat. Waxaa buugan ku siin doona dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha caafimaadka.

SOMALI

TILMAAMTA ISTICMAALKA QALABKA RESPIMAT®

ISTICMAALKA MAALINLAHA

Waxaad u baahan tahay inaad isticmaasho qalabkan **hal mar maalintii**. Mar walba **laba jeer** isku buufi



1. WAREEJI

- Daboolka ha xirnaado.
- **WAREEJI** salka hoose ee cad jihada falaata ilaa uu ka galo (wareejin barkeed).



2. FUR

- **FUR** daboolka ilaa uu si fiican u furmo.



LABA BUUFIN
MAR MAALINTII

3. RIIX

- Faruuraha ku qabo afka hore adigoo duleelada hawada aan daboolin. Duleeladaasi waxaa loogu tala galay neefsashada inta aad u diyaar noqoneysa buufinta.
- Marka aad diyaar u noqoto, si tartiib ah oo dheer afka uga neefso, riix badhanka sii deynta daawada si tartiib ah u neefso inta aad raaxo ka dareento. Ka dibna 10 ilbiriqsi isku reeb neefta ama inta suurtagalka ah.
- Ku celi **WAREEJINTA, FURIDA, RIIXID** qadar gaaraya 2 buufin.

GOORMA LA BEDELI DAAWADA RESPIMA AMA QALABKA NEEFTA

Tilmaamaha qiyaasta ayaa muujinaya inta buufis ee ku hartey daawada.



60 buufis ayaa haray.



In ka yar 10 buufis ayaa haray
Dalbo dawo cusub.



Daawada waa dhamaatey. Si otomaatik ah ayuu salka hoose u dabacysaa marka aad buufinta ugu dambeysa qaadato wareeji markaa qalabka buufinta. Ka soo bixi daawada qalabka. Geli daawo cusub.

Marka aad qalabka buufinta ku isticmaasho seddex daawo, soo qaado mid cusub oo daawo leh.

U DIYAARGROWGA ISTICMAALKA



Ka saar daboolka difaaca ee hufan

- Xir daboolka.
- Riix badhanka badbaadada isla markaas gacanta kale ku bixi salka hoose.



Geli daawada

- Geli daawada qalabka neefta.
- Saar qalabka meel adag ka dibna hoos u riix ilaa uu ka galo meesha.



Ku celi salka hoose meesheeda

- Ku celi salka hoose meesheeda ilaa ay gasho oo dhawaaq garaacid ah aad maqasho.



WAREEJI

- Xir daboolka.
- Wareeji salka hoose dhanka falaata ee ku qoran warqada ilaa uu ka galo (wareejin barkeed).



FUR

- Fur daboolka ilaa uu si fiican u furmo.



RIIX

- Dhanka dhulka u foorari qalabka.
- Riix badhanka siideynta daawada.
- Xir daboolka.
- Ku celi talaabooyinka 4-6 ilaa hawo cad ay muuqato.
- Ku celi talaabooyinka 4-6 seddex jeer oo kale.
- Qalabkaaga neefsashada hadda diyaar ayuu u yahay waxaadna ka helayasaa 60 buufis (30 qiyaasood).